







Aargoosigii shimbir- malabka

-  Zulu folktale
-  Wiehan de Jager
-  Anwar Mohamed Dirie
-  Somali
-  Level 4


(imageless edition)






Tani waa sheekada Ngede, shimbir-malabka, iyo nin yar oo dhuuni ah laguna magacaabay Gingile. Maalin goor uu Gingile ugaarsi tagay maqlay ci'da Ngede. Gingile afkiisa ayaa bilaabay in uu dhareero niyeysiga malab dartii. Wuu istaagay wuu na dhagaystay si taxadar ah, oo uu raadiyay ilaa uu arkay shimbirkii oo laamaha korka madaxiisa ku jiro. "Jiiq-jiiq-jiiq," ayuu ku shanqaray shimbiarki yaraa, isaga oo u duulay geedka ku xigo, hadana kan kale. "jiiq-jiiq-jiiq," ayuu ku ciyay, istaagayana marba mar si uu u hubsado in uu Gingile soo raacay.

Saacad barkeed ka dib, waxa ay soo gaareen geed berde duur baaxad le. Ngede waxa uu si waalli ah ugu boodbooday laamihii geedka. Dabadeedna waxa uu dul dagay mid ka mid ah laamihii, waxa uu na madaxiisa ku soo leexiyay Gingile sidii in la dhahayo, "Waa kan! Kaalay hada! Maxaa waqtigaas dheer u qaadanaysaa?" Gingile kama uusan arki karayn wax shinni ah geedka hoostiisa, laakiin waxa uu aaminay Ngede.




Gingile waxa uu warrankii ugaarsiga dhigtay geedka hoostiisa, waxa uu soo aruursaday xaabo, dab ayuuna shiday. Markii uu dabkii si fiican u shidmay, qori dheer oo qallalan ayuu dabkii galiyay. Qorigani waxuu khaasatan caan ku ahaa in uu sameeyo qiiq badan marka la shido. Waxa uu bilaabay fuullidii, isaga oo ilkaha ku haya dhanka qaboow ee qoriga qiiqaya.

Markiiba waxa uu maqli karay “sss-ssss” da dheer ee shinnida mashquulsan. Waxa ay ka galeysay kana soo baxaysay shinniddu meel dulleesha oo geedka jirridiisa ah - hoygeeda. Markii uu Gingile gaaray hoygii shinnida waxa uu qorigi qiiqayay ku riixay meeshii duleeshay. Shinnidii banaanka ayay u yaacday, sababtoo ah ma jeclayn qiiqa - laakin intaa ka hor waxay Ginglie siiyeen xoogaa qaniinyo kulul!




Markii ay shinnidii tagtay, Gingile waxa uu gacantiisa ku riixay buulki malabku ku jiray. Waxa uu kala soo baxay gacan buuxdo xabag-barsheed, tiftifqayso malab iyo diirdiir cadcad oo buudhan. Waxa uu si taxaddar leh ugu riday xabag-barsheedkii kiish uu garabka ku sitay, geedkiina waa uu ka soo degay.



Ngede waxa uu si xiiso leh u daawanayay wax walba oo uu Gingile sameynayey. Waxa uu sugayay in uu uga tago cad xabag-barsheed buurrana ah Shimbir-malabka si mahad celin ah. Ngede laanba laan ayuu uga duulay, ugu na sii dhawaanayay dhulka. Ugu dambeyn Gingile geedka salkiisi ayuu gaadhay. Ngede dhagax u dhow wiilka ayuu dul istaagay waxuu na suggay abaalmarintiisii.


Laakiin, Gingile dabkii ayuu damiyey, warrankiisii na qaatay oo socodkii gurigiisa billaabay, isaga oo inkiraya shimbirki. Ngede si carro leh ayuu u ciyey, “Fiiq-fifiq-fiifiiq!” Gingile inta istaagay, oo shimbirki yaraa eegay ayuu aad ugu qoslay. “Waxa aad rabtaa xoogaa malab ah, ma rabtaa, saaxiib? Ha! Laakiin hawsha oo dhan aniga ayaa qabtay, aniga ayaana qaatay qaniyo oo idil. Maxaan kuula qaybsadaa malabkan la jecelyahay?” Dabadeedna wuu iska dhaqaaqay. Ngede aad ayuu u carooday! Ma ay ahayn in sidan loola dhaqmo! Lakiin wuu aargoosan doonaa!



Asbuucyo badan kadib, maalin, markale ayuu Gingile maqlay ci'da malab sheega ee Ngede. Waxa uu xusuustay malabkii macaanaa, si xiiso leh na u dabagalay shimbirkii mar kale. Sidii uu kaynta dhinaceeda ugu horkacayey Gingile, Ngede waxuu dul istaagay geed weyn oo qodxo dallad ah leh si uu ugu nasto. "Ahh," Gingile ayaa ku fikiray. "Godka shinnida geedkan un buu ku yaal." dhaqso ba waxuu samaystay dabkii si yaraa waxa uuna bilaabay in uu fuulo, laanti yarayd ee qiiqeysayna ilkaha ku sita. Ngede wuu fariistay oo iska daawaday.

Gingile wuu fuulay, la yaabbanaa sababta uu u maqli waayay “Sss-sss-sss” di caadiga ahayd. “Malaha godku gudaha geedka ayuu sii jiraa,” ayuu ku fikiray. Laan kale ayuu kor usii fuulay. Laakiin halkii godkii shinnida eegii lahaa, waxa uu indhaha ku dhuftay haramcad! Haramcaddu aad bay uga carootay in hurdadeedii si edeb darro ah looga dhexgalay. Indhaha ayay isku kuduudday, afkeedana way kala qaadday iyada oo ilkaheeda waaweyn ee afka badan dibedda u soo saaraysa.

Intii ay haramcaddu weerarin Gingile, si degdeg ayuu hoos uga degay geedki. Degdeggii awgii ayuu laan gafay, waxa uu si shanqar culus leh ugu dhacay dhulka oo wareejiyay canqowgiisi. Sidii ugu dhakhsaha badneyd ee uu karay ayuu u dhutiyay. Nasiib lahaayaa, haramcaddu aad bay weli u sii hurdeysnayd haday cayrsan lahayd. Ngede, Shimbir-malabkii, wuu helay aargoosigi. Gingile na cashar ayuu bartay.



Sidaa darteed, markii Gingile ay carruurtiisa maqlaan sheekada Ngede waxa ay ixtiraam u qaadaan shimbirka yar. Mar walba oo ay malab soo gurtaan, waxa ay xaqiijiyaan in ay qeybta ugu weyn xabad barsheedka uga tagaan shimbir malabka!



Storybooks Canada

storybookscanada.ca

Aargoosigii shimbir-malabka

Written by: Zulu folktale

Illustrated by: Wiehan de Jager

Translated by: Anwar Mohamed Dirie

This story originates from the African Storybook (africanstorybook.org) and is brought to you by Storybooks Canada in an effort to provide children's stories in Canada's many languages.



This work is licensed under a Creative Commons
[Attribution 3.0 International License](http://creativecommons.org/licenses/by/3.0/).